

ISWIIDHISHKA AJNABIGA - SFI

Waa maxay SFI?

SFI waa kooras asaasi ah ee afka iswiidhishka. Waxan dhigan SFI haddii aad tahay qof qaan gaara isla markaana aanu afka iswiidhishka aheyn afkaada hooyo.

Waxad baraneysaa ku hadalka, aqrinta, qoridda iyo fahanka afka iswiidhishka. Waxad tababar ku sameyneysaa isticmaalka afka iswiidhishka ee nolol maalmeed, kan shaqo iyo bulshada dhexdeeda.

Adiga ka dhigta SFI Campus Mölndal waxaad heleysaa 15 saac ee jadwal waxbarasho todobaadki. Waxad kalood afka baran kartaa xilliga fiidka.

Waxbarashada ayaa lacag la'aan ah.

Kooras kasta ee aad dhameysato waxad heleysaa shahaaddo.

Wadooyinka waxbarasho iyo koorsooyinka

Waxad SFI-ga ku dhiganeyso sadax waddo ee waxbarasho SFI 1, SFI 2 am SFI 3. Waddada waxbarasho ee aad bilaabeyso waxey ku xiran tahay waaya aragnimadaada waxbarasho ee hore.

SFI ayaa ka kooban afar kooras oo kala duwan: Kooraska A, Kooraska B, Kooraska C iyo Kooraska D.

Sharaxidda waddooyinka waxbarasho iyo koorsooyinka:

- SFI 1: Waxaad leedahay waxbarasho yar ama maba lihid waxbarasho aad kala timid dalkaada. Qofka ku cusub afka iswiidhishka ee bilaabaya afka wuxuu ka bilaabayaa kooraska A.
- SFI 2: Waxaad leedahay waxbarasho mudo yar ee aad kala timid dalkaada. Qofka ku cusub afka iswiidhishka ee bilaabaya afka wuxuu ka bilaabayaa kooraska B.
- SFI 3: Waxaad leedahay waxbarasho dheer (ugu yaraan 10 sano) ee aad kala timid dalkaada. Qofka ku cusub afka iswiidhishka ee bilaabaya afka wuxuu ka bilaabayaa kooraska C.

Inta qofku dhiganayo SFI-ga waxey ku xiran tahay inta uu la ekaa afka iswiidhishka aad horey u taqaaney, waddada waxbarasho ee aad ka tirsan tahay iyo dhaqsaha aad afka u barato.

Yaa SFI-ga ka dhigan kara Campus Mölndal?

Waad dhigan kartaa SFI haddii aad jirto 16 sano ama da'a ka weyn isla markaana aanu afka iswiidhishka aheyn afkaada hooyo. Waxad codsan kartaa laga bilaabo 1 juulaay ee sanadka aad buuxiso 16 sano.

Adiga ka yimid wadan ka baxsan Midowga Yurub:

- Waa inaad leedahay toban lambar ee iswiidhish ah ee buuxa.
- Waa inaad ka diiwaan gashan tahay Mölndal.

Adiga ah wadani u dhashay wadamada EU-/EES ama ah wadani u dhashay Iswitserlaan:

- Waa inaad deggan tahay Mölndal. Waa inaad wadataa baasaboorkaada.

Sidee baan u codsan karaa SFI?

Waxad u tegeysaa hagaha waxbarasho iyo xirfadeeda ee Campus Mölndal si aad isu diiwaan geliso.

Xafiiska hagaha waxbarasho iyo xirfadeed ayaa furan khamiista saacadaha 10-12 iyo saacadaha 13-15, iyo jimcaha saacadaha 10-12. Adareeska booqashadu waa Göteborgsvägen 97 i Mölndal (eeriyada Krokslätts Fabriker).

Codsiga kadib waxa kula soo xiriiri doono macalin kula hadlayo. Waxa lagugu qorayaa waddada waxbarasho iyo kooraska SFI ee aad u qalanto iyadoo loo eegayo waxbarashadaadi hore.

Ma dooneysaa warbixin intaa dheer ee ku saabsan SFI?

Linki: [Skolverkets information om SFI för vuxna.](#)

Waxbarasho xirfadeed wadata gargaar af

Waxbarasho xirfadeed waa waxbarasho heer dugsi sare ah. Waxbarashadaa ayaa kugu hogaamineyso xirfad eeriyo cayiman. Waxbarashada xirfadeed ee wadata gargaarka afka waxad ku dhiganeysaa xirfad adigoo walibana dhigana SFI, afka iswiidhishka ee af labaad ah, ama waxaad heleysaa gargaar afka iswiidhishka ah ee kooraska.

[Agriso wax intaa ka badan ee ku saabsan waxbarashada xirfadaha ee wadata gargaar af.](#)